

Is qaadsiinta cudurkani waxa uu faafaa markeynu is cariirino

Maya, cudurkii Karoonuhu ma dhamaan. Welina caabuuqii wuu fidayaa, Wuxuuna aad usii fidaa markeynu is cariirino.

Gu'gii arday badan baa xaflado dad badani isugu yimid sameystay, taasoo kasoo hor jeeday, talooyinkii hay'adda caafimaadka. Hadda da'yar badan baa cudurkii qaaday. Badankood aad uma xanuunsan, laakiin isqaadsiintu wali way faafaysaa fayraskuna waxaa dhici karta in uu sii noolaado.

Xafladaha waa weyn sida aroosyada, wanqalka waa in la sugaa inta cudurku ka dhamaanayo. Isu tagyada diimeed sida duugista maydka, waxaa ka yaal sharciyo gaar ah.

Khatarta ugu weyn ee qaadista cudurkani waxa ay ku badan tahay darawalada tagaasida iyo basaska

Baaritaan ay samaysay hay'adda caafimaadku waxaa lagu ogaaday in dadka ka shaqeeya meheradaha /shaqooyinka qaarkood ay khatarta cudurku ku badan tahay. Tusaale ahaan dadka tagaasida iyo basaska wada, kuwa ka shaqeeya maqaayadah biisada, turjumaanada, cunto kariya yaasha, iyo daka fuliya adeegyada kala duwan. In ka badan 2,5 jeer ayey dheeryihiin dadka kale iney cudurka qaadaan.

Hadii aad qabato shaqooyinka noocaas ah; lahadal madaxdaada una sheeg inaad difaac dheeraad ah hesho, si aad si nabadgelyo ah ugu shaqayso.

Dadka iskuulada ka shaqeeya kuma dhicin in ka badan dadka intiisa kale. Kuwa caafimaadka ka shaqeeya baaritankan kuma jiraan. Mid u gooniya baa soo bixi doona.

Siyaabo kale oo aad dadka u tix gelin karto una maa muusi karto

Waxa ugu dhibka badan waqtigan hadda ah waxa uu yahay, in aadan dadkii u salaami karin sidii hore. Ma dhunkan kartid, oo jir ahaana uma salaami kartid.

Wayse adagtahay, sababtoo ah si'caadi ah baad u baratay in aad dadka u gacan qaado. Laakiin hadda ixtiraamku wuxuu ku jiraa in aadan qofkii cudur qaadsiin. Si kale u salaam dadka hadda. Miyaadan gacanta u haadin karin, hawada ka dhunkan karin, madaxa u ruxi karin? Ama samee sida marku qof xanuunsanyahay aad samayso, gacantaada wadnaha saar.

U muuji ixtiraam iyo wanaag sidan:

- Ha soo booqan qof xanuunsan-teleefoon ka wac.
- Ha gacan qaadin ama xabadka ha saarin-gacanta wadnaha saar, madaxa rux ama u gacan haadi.
- Ilaali kala fogaanshaha - geesinimo u yeelo inaad si kale oo aan sidii hore ahayn u salaanto dadka.

Mas'uuliyad dheerad ah isa saar xilliga xagaaga

Xilliga xagaaga dad badan baa jooga gobolkeena. Sidaa daraadeed ka fakar :

- Ma ciriiri baa xeebta ama meeshaad dooneyso inaad biknik u fariisato? – meel kale tag.
- Ma ciriiri baa dukaamada ama maqaayadaha- la hadal qofka leh, meel kale tag ama waqti kale imow.
- Ka fikir xaaladaada iyo tan goyskaadaba, markey u babaahan yihiin iney taxa daraan, mas'uulna noqdaan.
- Sida ugu wanaagsan ee aad qof u ixtiraami kartaa una qadarin kartaa, waa adigoon cudurkan faafin.

Khatar naftaada ha gelin – fakirna!



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa. Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska arrimaha degdega ah ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa ka cusub karoona" labadii wiigba mar bay soo bixi doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.

Kalmar kommun



facebook.com/krissamverkan.kalmar